



Bayaanka Saameynta Sinnaanta: Qandaraaska Kormeerayaasha Baska

Cinwa Midowga Shaqaalaha-birta Maxaliga ah 2936 Heshiiska Aan-
anka: go'nayn

Taariikh: Janaayo 18, 2023

Miyaa [Agabka Qorshaynta Sinnaanta Isirka](#) la isticmaalay? X Haa Maya

Hadday haa tahay, geli taariikhda kulamada REPT iyo isku xidhka REPT ee la dhammaystiray halkan: N/A

Miyuu xubin ka ahaa Qeybta Sinnaanta, Xeelada iyo Nusqaamaha Fursad dib-u-eegay bayaankan? X Haa Maya

Qaybaha Agabka Qorshaynta Sinnaanta Isirka BPS	Soo koobida/Caqli galka
<p>1. Soojeedin/Bandhig & Saameyn <i>Maxay yihiin natiijooyinka dadaalka la doonayo, oo ay ku jiraan baabi'inta khilaafaadka? Yaa shaqadan hogaamiyay, oo miyay ka tarjumayaan aqoonsiga kooxda ardayda BPS iyo qoysaska (kooxaha muhiimka ah waxaa ka mid ah shakhsiyaadka madow, Latinx, Aasiyaan, asal ahaan, muhaajir, luuqado badan ku hadla, oo leh khibrad waxbarasho gaar ah)?</i></p>	<p>Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) iyo Midowga Shaqaalaha-birta Maxalliga ah 2936 (Midowga Kormeerayaasha Baska) ayaa wada xaajooday oo waxay gaadheen laba Heshiiska Qoraalka ("MOAs") si hordhac ah loogu heshiiyey, kuwaas oo ay ansixiyeen xubinimada ururka Diseembar 17, 2022. Heshiisyada - mid laba sano ah iyo mid saddex sano ah - ayaa loo gudbinayaa guddiga dugsiga si ay u ansixiyaan.</p> <p>Mid ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee Waaxda Gaadiidka ee BPS waa yaraanta kormeerayaasha baska, maadaama ay si xun u saamayso helitaanka waxbarashada ardayda baahiyaha gaarka ah qaba. Kordhinta heshiiskan ee mushaharka, faa'iidooyinka, iyo gunnooyinka, waxaan rajeyneynaa inaan si wanagsan u haysano shaqadeena hadda, soo jiidano musharaxiin badan, oo aan u tababarno kormeerayaasheena si wax ku ool ah.</p> <p>Kooxda hogaaminta gaadiidka iyo xafiiska xidhiidhka shaqada ayaa hogaaminayay shaqadan. Kooxdani waxa ay wakiil ka yihiin jinsiyadda iyo tirakoobyada kale ee jaaliyada BPS.</p>
<p>2. La jaanqaadida Qorshaha Xeeladeed <i>Sidee buu bandhigu ula jaan qaadayaa qorshaha xeeladeed ee degmada?</i></p>	<p>Qorshaha xeeladeed ee degmadu waxa uu udub dhexaad u yahay ciribtirka daldaloolada fursadaha iyo horumarinta sinaanta waxbarashada. Kordhinta magdhowga kormeerayaasha baska, soo jeedintani waxay yaraynaysaa hal caqabad oo muhiim ah in ardayda baahiyaha gaarka ah qaba looga soo qaado dugsiga si nabad ah.</p>
<p>3. Falanqaynta Xogta <i>Maxaa xog ah oo la la falanqeeyay? Ma waxaa la kala saaray isir iyo kooxo kale oo muhiim ah? Maxay muujisay kala duwanaanshaha?</i></p>	<p>Kormeerayaasha baska waxa la siiyaa celcelis ahaan ku dhawaad \$18,000 sanadkii marka loo eego heshiiskii hore. In ka badan 90% shaqaalaha kormeeraha waa dadka midabka leh. Anagoo og in tani aanay ahayn mushahar nololeed oo ku filan, waxaanu baadhitaan ku samaynay miisaanka mushaharka ee dhawr degmo oo u dhigma kuwayada, waxaanu soo bandhignay soo jeedinta hadda oo ay ku jirto mushahar sare oo saacadle ah, wakhti dheeraad ah oo fasax ah, iyo gunnooyin shaqaaleysiin iyo haynta.</p>
<p>4. Kaqeybgalka Daneeyayaasha <i>Yaa ku hawlanaa (tiro, tirooyin, iyo doorar), sidee iyo maxay soo saartay? Maxay yiraahdeen ardayda/qoysaska ay aadka u saameysay soo jeedintu/bandhigu?</i></p>	<p>Qoysaska ardayda leh baahiyaha gaarka ah, u doodayaasha, iyo xubnaha bulshada ayaa si joogto ah u muujiyay baahida loo qabo buuxinta kormeerka baska kasta oo furan, iyo in la ilaaliyo shaqaalaha kormeerka baskayaga. Waxaan aaminsanahay in qandaraaskan la soo jeediyay uu gacan ka geysan doono gaaritaanka hadafka muhiimka ah.</p>

<p>5. Xeeladaha Sinnaanta Isirka <i>Sidee ayay soo jeedintani u yaraynaysaa kala duwanaanshaha una kordhisaa sinnaanta jinsiyadda iyo kuwa kale? Waa maxay cawaaqibta aan loo baahnayn ee suurtoogalka ah? Waa maxay xeeladaha dhammaystirka ah ee sii horumarin doona sinnaanta?</i></p>	<p>Markay kormeerayaasha u beddelaan heerka mushaharka saacaddii, halkii ay ka bixin lahaayeen run kasta, BPS waxay magdhow siin doontaa dhammaan wakhtiga ay baska raacayaan, oo ay ku jiraan dib u dhac kasta oo ay sababto taraafikada, shilalka baska, iwm. wareeg; si kastaba ha ahaatee, BPS waxaa ka go'an inay tijaabiso oo ay si joogto ah u wanaajiso habkeena si loo hubiyo inay u shaqeyso sidii loogu talagalay. Dammaanadda ugu yar ee cusub ee 1.4 saacadood ee shaqo kasta oo la shaqeeyo waxay ka ilaalin doontaa suurtoogalnimada in la dhimo magdhowga kormeerayaasha shaqeeya hal orod oo keliya.</p>
<p>6 Miisaaniyad & Hergelinta <i>Waa maxay saamaynta miisaaniyaddu? Sidee hirgelintu u xaqiijinaysaa in la gaaray ujeedooyinka sinnaanta? Ma jiraan hoggaan iyo shaqaale Madaw, Latinx ah oo keena muraayada sinaanta isirka?</i></p>	<p>Wadarta kharashka qandaraaska shanta sano ah waa \$10,129,561. Inta lagu jiro iyo ka dib fulinta labadaba, kooxda Gaadiidku waxay hubin doonaan in kormeerayaasha la bixiyo sida ku cad heshiiska.</p> <p>Gaadiidka iyo Xafiiska Raasamaalku Aadanaha waxay mas'uul ka noqon doonaan hirgelinta. Aqoonsiga kooxeed ee kooxaheennu waa wakiil ka socda bulshada BPS iyo kormeerka shaqadeena.</p>
<p>7. Isla-xisaabtan & Isgaarsiin <i>Sidee saamaynta loo qiimaynayaa, loo diiwaan gelinayaa oo loogu sheegi doonaa daneeyayaasha? Yaa ka masuul ah?</i></p>	<p>Kooxda Gaadiidku waxay sii wadi doonaan inay qiimeeyaan saamaynta maaliyadeed ee heshiiska, iyo sida ay u saamayso dadaalka shaqaaleysiinta iyo sii-haynta.</p> <p>Gaadiidka waxaa ka go'an qiimeynta joogtada ah ee saameynta hirgelinta si loo hubiyo in ay keento koror mushahar saacadle ah.</p>